

ISDIIWAANGELINTA

MAALINTA DOORASHADA

VOTE I WILL VOTE 2016

Si aad isaga diiwaangeliso goobtaada codbixinta maalinta doorashada, waxaad la timaada hal caddayn degganaansho ee liiska hoose.

① WARQAD AQOONSI (ID) OO LEH MAGACAAGA IYO CINWAANKAAGA HADDA

- Shatiga dareewalka ee Minnesota oo aan dhicin, ruqsadda bartaha ama Warqad Aqoonsi; ama risiit kuwaan midkood ah.
- Warqadda Aqoonsiga Qabiil oo magac, cinwaan, sawir iyo saxiix leh.

② WARQAD AQOONSI OO LEH SAWIR AYNA WEHELISO DUKUMIINTI LEH, MAGACAAGA IYO CINWAANKAAGA HADDA

Warqadaha Aqoonsiga oo sawirka leh ee la aqbalayo

Mid dooro. Hadduu rabo ha ahaado mid dhacay.

Shatiga dareewalka, Warqad Aqoonsi ee gobol ama ruqsadda bartaha oo uu soo saaray gobol uun

Baasaboar Maraykan ah

Ciidamada Maraykanka ama Warqadda Aqoonsiga ee Askartii Hore

Warqadda Aqoonsiga Qabiil oo magac, saxiix, iyo sawir leh.

Warqad Aqoonsi ee Jaamicad, kuleejo ama kuleejo farsamo ee Minnesota

Warqad Aqoonsi ee dugsi saree ee Minnesota

Dukumiintiyada la Ogolyahay

Mid dooro. Waxaa lagu tusi karaa qalab elektronik ah.

Qaansheeg, koonto ama caddayn adeeg la bilaabay ama taariikhdiisu tahay 30 maalmood gudahood maalinta doorashada oo ah:

- * Taleefoon, TV ama internet
- * Qashinka, bulaacad, koronto, gaas ama biyo
- * Dukumiinti bangi ama kiridhit kaar
- * Ijaar ama mortgage

Heshiis dheer oo deeggaansho ama heshiis kiro oo shaqaynaya ilaa Maalinta Doorashada

Caddayn ah lacag arday bixiyo oo hadda ah

waa socotaa eeg bogga gadaale...

Xafiiska Xoghayaha Gobolka Minnesota

mnvotes.org • 1-877-600-VOTE

ISDIIWAANGELINTA

MAALINTA DOORASHADA

VOTE I WILL VOTE 2016

...ka timid horay

③ CODBIXIYE DIWAANGASHAN OO XAQIJJIN KARA CINWAANKAAGA

Codbixiye diwaangashan oo xaafaddaada deggan ayaa kuu raaci kara goobta codbixinta si uu u saxiixo dhaar xaqiijinaysa cinwaankaaga. Tan waxaa la yiraahdaa 'damaanad'. Codbixiye diwaangashan wuxuu damaanad qaadi karaa ilaa iyo sideed codbixiye. Adiga haddii cid ku damiinatahy adigu cid ma damiinan kartid.

④ WARQADDA AQOONSIGA EE ARDAY KULEEJA DHIGTA OO AY WEHELISO LIISKA GURYAHA ARDAYDA

Kuleejooyinka iyo jaamicaduhu waxay u soo diraan saraakiisha doorashada liiska guryaha ardayda. Haddii aadan ku jirin liiska, tus Warqaddaada Aqoonsiga ee arday kuleejo dhigta si aad u dhammays tirto isdiiwaangelintaada.

⑤ ISDIIWAANGELINTA SHARCIGA AH EE XAAFADDA

Haddii aad xaafadda ka diwaangashan tahay laakiin aad magacaaga beddeshay ama meel kale oo isla xaafadda ah u guurtay, waxaad u baahan tahay oo kaliya in aad u sheegto garsooraha doorashada magacaagii ama cinwaankaagii hore.

⑥ OGYSIIS ISDIIWAANGELIN DAAHSAN

Haddii aad isdiiwaangelisay si aad u codaysid labaatn maalmood gudahood maalinta doorashada, waxaa laga yaabaa in boosta aad ka hesho Ogaysiis Isdiiwaangelin Daahsan. La imaw una isticmaal ogaysiiskaas caddayn degganaansho si aad isdiiwaangelisid.

⑦ QOF KA SHAHAQEEYA XARUN DEGGANAANSO

Haddii aad ku nooshahay xarun degganaansho, qof shaqaale ah ayaa kuu raaci kara goobta codbixinta si uu u xaqiijyo cinwaankaaga. Tan waxaa la yiraahdaa 'damaanad'. Qof shaqaale ah wuxuu damiinan karaa dhammaan codbixiyayaasha u qalma ee ku noon xarunta.

Xafiiska Xoghayaha Gobolka Minnesota

mnvotes.org • 1-877-600-VOTE

Bisha 3aad (March) 2016